

Graphical Repairs Ordering Service User Guide - Somali

Habka Sawirrada ee Dalabka Dayactirrada

Habka Sawirrada ee Dalabka Dayactirrada (Graphical Repairs Ordering system 'GRO') waa hab internetka ah oo ay isticmaali karaan degaanka iyo dadka guryaha ka ijaartay shirkadda Hounslow Homes.

Iyadoo lagu tusayo sawirro kala duwan, ayaad ka garan kartaa dayactirrada uu gurigaagu u baahan yahay si aad u soo sheegtid (haddii aad tahay macmiil degaan), iyo dayactirrada goobaha dadku wadaagaan/xaafadda aad ku nooshahay iyo garaashkaaga (haddii aad naga kiraysatay).

Adigoo adeegsanaya habka dayactirrada ee internetka ah waxaad awoodaa inaad:

- dayactirrada u dalabtid gurigaaga, waddada/xaafadda (goobaha dadku wadaagaan) goobta aad ku nooshahay, iyo garaashkaaga (haddii aad midkood naga kiraysatay)
- hubisid shaqada la qabanayo iyo ballamaha dayactirrada aad codsatay
- codsatid dayactir ama kormeer gurigaaga lagu sameeyo ama goobaha dadku wadaagaan ee degaanka aad ku nooshahay
- inaad buukin-garaysatid shaqooyinka aad codsanaysid in lagu qabto
- codsatid wax ka badan hal dayactir oo lagu sameeyo guriga, xaafadda ama garaashka

Markii aad dhammaystirtid codsiga, waxaan ku siinaynaa lambarka tixraaca shaqada, boostadana waxa laguugu soo dirayaa iyadoo qoraal ah. Taasi waxay kuugu imanaysaa 5-10 maalmood.

Muhiim!

Haddii aad aaminsan tahay in dayactirku degdeg yahay, fadlan kala xiriir xarunta Repairs Call Centre telefoonka bilaashka ah 0800 085 65 75. Adeegga Saacadaha Shaqada ka baxsan soo wac 0208 583 2222.

Marka hore is tijaabi!

Haddii aad nidaamka ku cusub tahay, waxaad booqan kartaa qaybta lagu magacaabo is tijaabi (try it out). Waa meel aad isku tijaabin kartid iyo in fikrad lagaa siiyo waxyaabaha lagaa filnayo.

Waxaad arki kartaa sawirrada iyo noocyada dayactirrada aad codsan kartid, iyo weliba inaad tijaabisid doorashada dayactirrada iyo buukin-garaynta ballamaha.

Fadlan ogow: Wixii macluumaad is tijaabin ah ee lagu dhaafo qaybtan tijaabada ah lama kaydinayo ama lama buukin-garaynayo wax ballan ah.



Isticmaalka nidaamka

Si isticmaalku kuugu sahlanaado waxa jira batanno ama xiriiro sahlan oo aad isticmaali kartid oo bogga ku yaal. Qaar waxay kugu xirayaan warbixino kale, waxana lagu helayaa qoraal ahaan, sida [more](#).

Qaar kale waa sawiro ama calaamado, xiriiro iyo batanno sidan u eg:



'Batanada' waxa laga heli karaa dhinaca midig ee cirifka hoose ee bogga. Mararka qaarkood waxaad u baahanaysaa inaad bogga 'kor iyo hoos' u waddid si aad u aragtid.

Xiriirrada waxay yeelan karaan calaamadaha kore oo kale. Bogagga qaarkood waxaad arki kartaa mid ama kuwo badan oo ka mid ah calaamadaha.



sii wad/dooro

Calaamaddani horey ayey kuu wadaysaa. Riix calaamadda saxda marka aad doonaysid inaad bogga xiga u gudubtid, tusaale ahaan waxaad dooratay dayactir waxaadna diyaar u tahay inaad u gudubtid bogga xiga.



Noqo

Calaamaddan waxaad ku arki kartaa bogagga badankood. Batanka calaamadda is-tallaabka oo aad riixdid waxay kugu celinaysaa bogga **Property Selection ama Repairs History**, oo ugu horreeya bilowga nidaamka dalbashada.

Haddii aad doonaysid inaad boggi hore ku laabatid, waa inaad isticmaashaa batanka ay ku qoran tahay 'dib ii celi ama back oo ku yaal mastaradda furayaasha oo bidixda cirifka kore ee bogga, waxayna u eg tahay sidan:



Graphical Repairs Ordering Service User Guide - Somali



Caawimo iyo talobixin

Nidaamka oo dhan, waxaad heli kartaa bogag kuu fidinaya caawimo iyo talobixin dheeraad ah oo kaa caawinaya isticmaalka adeegga. Calaamaddan oo aad riixdid waxay ku gaynaysaa bogagaas.

Haddii ay jiraan warbixino kale oo ku saabsan dayactirka, ama bogga aad raadinaysid, batankaas wuxu ku gaynayaa bog ku caawinaya (oo kuu sharraxayo sida loo isticmaalo oo aad u soo sheegi lahayd dayactirka) ama xaashi talobixineed (oo ku siinaya tilmaamo iyo warbixino ku saabsan dayactirka)

Qaar ka mid ah xaashiyahaas talobixinta waxaad ka arki kartaa shaashadda inkastoo aadan riixin batanka? oo caawimo doon ah. Taas macnaheedu waxa weeye inaad aragtid warbixin muhiim ah oo ay tahay inaad aragtid ka hor inta aadan sii soconin, tusaale ahaan in dayactirkaagu u baahan yahay in degdeg wax looga qabto.

Warbixinaha ku jira xaashiyaha caawimada iyo talobixinta waxa kaloo laga heli karaa bogga Soo Sheegista Dayactirka.

Lambarka koontada iyo lambarka qarsoodiga ah

Si aad adeeggan u isticmaashid, waxaad u baahanaysaa lambarka aad ku galaysid koontada iyo lambarka qarsoodiga kuu ah. Lambarka koontada waxa uu noqonayaa lambarka lagugu aqoonsado, oo sidoo kale loo yaqaan PIN.

Lambarka koontada adiga ayuu gaar kuu yahay waxaana loo isticmaalaa inaad ku soo sheegtid dayactirrada uu u baahan yahay gurigaaga, goobaha la wadaago / xaafadda aad ku nooshahay, ama garaashka, haddii aad naga kiraysatay. Sidoo kale waxay kuu oggolaanaysaa inaad aragtid faahfaahinta dayactirka ee hore looga soo sheegay guriga, goobaha la wadaago / xaafadda aad ku nooshahay ama garaashka. Liis tusaya goobaha aad dayactirka u doonaysid ayaa kuu soo qormaya marka aad gashid.

Haddii aadan haysanin lambarka koontada ama lambarka sirta ah fadlan iimayl ugu soo dir magaca iyo cinwaankaaga xarunta Repairs Call Centre cinwaankuna waa: housing.repairs@hounslowhomes.org.uk

Haddii kale, waxaad xarunta Repairs Call Centre toos ugala soo xiriiri kartaa lambarka bilaashka ah ee **0800 085 65 75** – adigoo sheegaya magaca iyo cinwaankaaga.

Arrimo dhinaca ammaanka ah dartood, lambarka koontada iyo lambarka sirta ah waxaa laguugu soo diri doonaa dhinaca boostada.



Gelitaanka

Si aad u gashid, waa inaad qortaa lambarka aqoonsigaaga garaka ah (PIN) iyo lambarka sirta kuna qoraya khaanadaha loogu talagalay ee hoose. Lambarka sirta ah waxaad ku qori kartaa far waaweyn iyo far yar intaba.

Order a repair

Enter your PIN: Enter your password: Continue  Help 

Haddii lambarku sirtu kaa lumo, booqo qaybta bogga ee lagu magacaabo 'using the system - your user account and password' si aad u heshid warbixino ku saabsan sida naloola soo xiriiro loona codsado lambarka sirta ah oo cusub.

Marka aad qortid lambarka PIN iyo kan sirta ah, riix sii wad (oo ah calaamadda saxda) si aad bogga u sii gashid.



Bilowga

Soo Sheegista dayactirka

Markii aad dayactir codsanaysid, hubi inaad haysid dhammaan macluumaadka ku saabsan cilladda ka hor inta aadan bilaabin. Tusaale ahaan:

- Ciladdi ma gudahaa, ma dibeddaa, ma degaanka (mise meelaha la wadaago)?
- Haddii ay gudaha tahay, waa qolkee?
- Haddii ay dibedda tahay (meelaha la wadaago), sheeg goobta saxda ah, tusaale ahaan meesha baabuurta la dhigto, qolka weelka qashinka, koroddooyada, ganjeellooyinka weyn ee laga soo galo?
- Si sax ah u sheeg ciladda? Tusaale ahaan, meel liigaysa, aan shaqaynayn, meel jabtay, iwm.
- Ciladdu ma saamaysay meel kale oo guriga ah? Tusaale ahaan, in liigistu u sii gudbayso qolka kale
- Haddii ciladdu la xiriirto meel la kabayo, sheeg nooca kabka? Tusaale ahaan xarigga la jiido ee nalka laga shido, udub/gacan/qasabad?

Waxaad ka eegi kartaa dayactirrada buug-gacmeedka lagu magacaabo 'Reporting your repairs' ama bogga internetka shirkadda Hounslow Homes 'Reporting repairs' si aad u heshid tilmaamo iyo warbixinaha aad na siin kartid si aad nooga caawisid qabashada dayactirkaaga.



Dooro goobta dayactirka u baahan

Ka hor inta aadan dayactirka dooranin, sheeg meesha saxda ah ee dayactirka u baahan. Tusaale ahaan ciladdu ma waxay saamaynaysaa gurigaaga oo keliya ama meelaha la wadaago?

Inaad dooratid meel qalad ah waxay dib u dhac ku keeni kartaa in dayactirka la qabto.

Liiska goobaha aad dayactirka uga baahan kartid ayaa hoos ka muuqda.

Haddii aad ijaarte tahay (leaseholder), ma soo sheegaysid ciladda gurigaaga, waxaad soo sheegi kartaa meelaha la wadaago iyo garaashka (haddii aad naga kiraysatay). Warbixin kale oo ku saabsan cilladaha fadlan eeg Buug-gacmeedka Ijaartaha ama heshiiska kiradaada.

Si aad u dooratid goobta dayactirka u baahan, riix calaamadda sax ama batanka (sii wad) ee cinwaanka ku xigta.

Your Property Selection Details

You may raise repairs to any of the following locations:

Address	Postcode	Description
1 Try It Out Street	TRY1TO	Flat





Hubi dayactirradka- ma laga yaabaa inaad cilladda hore u soo sheegtay?

Ka hor inta aadan cillad soo sheegin hubi in hore loo dalbay.

Waa muhiim siiba marka aad soo sheegaysid goobaha la wadaago maadaama ay dhacdo in dadka kale ee xaafaddu ay soo sheegeen cilladda.

Si aad u hubisid liiska cilladaha ka hor inta aadan bilaabin, eeg dayactirada la dalbay. Haddii dalab maqan yahay, mar labaad looma baahna. **(Ogow:** Waad hubin kartaa faahfaahinta cilladda adigoo riixaya batanka oranaya [more.](#))

Repair History Listing for

1 Try It Out Street TRY ITO

Please check the list of existing jobs for this address before requesting a new order. If a current duplicate order exists, you will not be able to complete your order or book any appointments.

From: June 2006 To: July 2006

Job No. Reported Status Appt. Date Appt. Slot Description

Job No.	Reported	Status	Appt. Date	Appt. Slot	Description
2162	19 May 2006	In progress	n/a	n/a	Repair to timber external, internal or communal door and frame or lining, any type or size or location more...
2158	19 May 2006	In progress	n/a	n/a	Sealant to bath edge more...
2144	19 May 2006	In progress	30 May 2006	12:06	Resecure loose or defective floorboards in bedroom. more...
2130	19 May 2006	In progress	24 May 2006	10:00	Resecure loose or defective floorboards in living room. more...
2126	19 May 2006	In progress	30 May 2006	13:30	Carry Out Repair to Lighting Pendant/Batten Holder in Living Room more...
2112	19 May 2006	Cancelled	n/a	n/a	Repair Bathroom door, frame or lining. more...
1316	15 May 2006	Cancelled	n/a	n/a	Not Available more...

Haddii aad ku celisid dalab hore loo sameeyey, sistamka ayaa kuu sheegaya inaad mar labaad dalab samaysay, oo aan ballan lagu qabanayn.


Haddii ay kula tahay in dalabka uusan ahayn mar labaad, fadlan nagula soo xiriir iimayl ama toos u soo wac xarunta wicitaanka Call Centre.

Markii aad hubisid in hore loo dalbay, hoos u dhaqaaq ilaa aad tagtid xagga hoose ee bogga kadibna riix:

- Sii wad – si aad cilladda u sheegtid
- Noqo – si aad ugu noqtid guriga iyo bogga xulashada
- Caawimo – si aad u heshid talobixin ku saabsan xaaladda dayactirka.

[more...](#)


Bathroom door, frame or lining. [more...](#)




Graphical Repairs Ordering Service User Guide - Somali

Dooro qolka ama goobta la wadaago/dhismaha

Waxaad dooran kartaa qolka cilladda qaba adigoo riixaya sawirka ama batanka ka hooseeya.



Haddii aad dooranaysid goob la wadaago, dooro sawirka ama batanka ku habboon ee gudaha ah ama dibedda tilmaamaya.



Kadib waxaad arkaysaa sawirka qolka ama goobta aad doonaysid ama dooranaysid.



Haddii ay kula noqoto inaad sawir qalad ah dooratay, riix batanka dib ii celi ee cirifka bidix ee xagga kore ee bogga si aad ugu noqotid bogga kala doorashada.

Haddii aad riixdid batanka **X** waxaad ku noqonaysaa bogga Dayactirrada Hore ee bilowoga u horreeya.

- [Service Duct Access Panel](#) • [Communal Windows](#) • [Rubbish Chute](#) • [Communal Doorways](#) • [Lifts](#) • [Lighting](#) • [Balcony Drainage](#)
- [Fire Extinguishers](#) • [Fire Hose Reel](#) • [Intake Rooms](#) • [Signage](#) • [Dry Riser Outlets](#) • [Drains](#) • [Broken Balcony Panel](#) • [Balustrade](#)
- [Graffiti](#) • [Corridor Floor Covering](#) • [Balcony floor Covering](#) • [Flat Entrance Door](#) • [Meter Cupboard](#) • [Block Paved Areas](#) • [Corridor Lighting](#) • [Staircase Handrails](#) • [Staircase](#) • [Pram Shed](#)



Graphical Repairs Ordering Service User Guide - Somali

Dooro dayactirka

Si aad dayactir u dooratid, mawska ku kor dhaqaaji sawirka si aad ugu riixid sawirka aad u doonaysid dayactirka, sida saxanka dhaqmaha gacmaha oo kale. Riix qasabadda sawirka ka muuqata.


Markii aad mawska dhaqaajisid, waxa kuu soo baxa magaca sawirka aad kor saartay.

Sidoo kale waxaad riixi kartaa batannada ka hooseeya sawirrada.


Haddii dayactirka kuu furan yahay wax ka badan hal cillad-bixin, sida qasabadaha kala duwan, waxaad arkaysaa sawirro kale oo kuu soo baxaya.

Kadibna waxaad dooranaysaa nooca kabka u habboon gurigaaga, sida gacanka qasabadda oo kale.

Haddii aad nooc xulatid/ama kabka aad doonaysid uusan ka mid ahayn kan guriga kuugu jira, dayactirka dib u dhac ayaa ku iman kara.



▶ Wash Hand Basin Taps ▶



▶ [Pillar Tap](#) ▶ [Bib Tap](#) ▶ [Mixer Tap](#) ▶ [Shower Head & Hose](#) ▶ [Gate Valve](#) ▶ [Stop Cock](#) ▶ [No Hot Water](#) ▶ [No Cold Water](#)



Dhammaystirka dalabkaaga

Marka aad dayactirka dooratid, warbixintaada waxa laga dhigayaa dalab. Hubi in macluumaadka dalabku saxsan yihiin:

Hubi in warbixinta dayactirku tahay tan aad u baahan tahay. Haddii aad dooratay mid qalad ah, riix batanka dib ee celi ee bidixda xagga kore ee bogga. Haddii aad riixdid **X**, waxaad ku noqonaysaa bogga xulashada dayactirka guriga.

Repair Description:

Resecure loose or defective floorboards in Kitchen

Qor sida laguula soo xiriirayo. Waa haddii loo baahdo in lagaala hadlo dayactirka. **Fadlan ogow:** inaad meeshaas buuxisaa waa 'lagama maarmaan'; ama waa **qasab** inaad buuxisid. Ma sii wadi kartid ilaa aad ka qortid lambarka lagaala soo xiriirayo.

Contact Phone Number:

029 78376329

Mobile Phone Number:

Waxaad qori kartaa lambarro lagaala soo xiriiro oo aan ka ahayn kuwa muhiimka kuu ah haddaad doontid.

Macluumaadka aad bixinaysid waa inay ku jiraan waxyaabaha aad dareemaysid inay muhiim u yihiin qofka Shaqaalaha ah ee shaqada qabanaya. Waxaa ka mid noqon kara:

Please enter information regarding any special access arrangements.

Access Details:

- Warbixinaha dheeraadka ah ee cilladda jirta
- Macluumaadka ku saabsan gelitaanka guriga, sida in furitaanka gurigu ay waqti dheer kugu qaadato

Markii aad macluumaadkaas qortid, riix batanka oranaya sii wad.





Buukin-garayso ballantaada

Marka aad dhammaystirtid dalabka dayactirka kadibna aad riixid batanka sii wad, waxaad buukin-garaysatay ballan shaqo looga qabto guriga.

Waxaan haynaa nidaam oggolaanaya 2 nooc oo ballamo ah.

- Ballanta **Kormeerka** ah – oo ah in dayactirka la soo xaqiijiyo, la sameeyo cabbiraadda loo baahan yahay isla markaana loo qiimeeyo wixii agab ah ee loo baahan yahay
- Ballanta **Rasmiga** ah – oo ah ballanta lagu samaynayo dayactirka.

Marka **hore** waxaad dooranaysaa ballanta **Rasmiga** ah. Maadaama ay balantani waqti fiican u baahan tahay, firaqo weyn oo loo helo way fiican tahay, sidaas darteedna waxa uu nidaamku raadinayaa waqtiga ugu horreeya ee u oggolaanaya qofka shaqada qabanaya waqti ku filan.

Intaas kadib waxaa lagaa codsan doonaa inaad samaysatid ballanta **Kormeerka** ah oo la doonayo inay dhacdo ugu yaraan **2** maalmood **ka hor** ballanta **Rasmiga** ah. Maadaama ay ballantani gaaban tahay, waa suurtoagal in waqti gaaban lagu helo, sidaas darteedna waxa la heli karaa ballamo badan oo noocan oo kale ah.

Waa inaad qorataa lambarka qabashada shaqada. Haddii aad nala soo xiriritid waa inaad lambarkaas sheegtaa.

Please make a note of the job number for future reference:

1275

Waxaa lagu siin doonaa liis tusaya waqtiyada ballamaha ee furan.

Xilliyada ballamuhu waa:

- AM – 8.00am – 12.30pm
- PM – 12.30pm – 4.30pm
- Maalinta oo dhan – 8.00 am – 4.30pm

Haddii aad dooratid maalinta oo dhan, waxa lagu imaanayaa waqti ka mid ah maalinta oo dhan.


Waa inaad bogga hoos u riixdaa ilaa aad ka heshid taariikh kuu habboon. Haddii aad taariikho kale u baahan tahay riix [more](#).

Date	Slot	
07 Jul 2006	08:00 - 12:30	✓
07 Jul 2006	08:00 - 16:30	✓
07 Jul 2006	12:30 - 16:30	✓
10 Jul 2006	08:00 - 12:30	✓
10 Jul 2006	08:00 - 16:30	✓
10 Jul 2006	12:30 - 16:30	✓
11 Jul 2006	08:00 - 12:30	✓
11 Jul 2006	08:00 - 16:30	✓
11 Jul 2006	12:30 - 16:30	✓
12 Jul 2006	08:00 - 12:30	✓

Dooro waqtiga ballanta adigoo riixaya batanka sii wad ee waqtiga ku xiga.

Graphical Repairs Ordering Service User Guide - Somali

Marka aad dooratid ballanta rasmiga ah iyo tan kormeeridda, waxa lagu weydiin doonaa inay labaduba kuu habboon yihiin.


Si aad wax uga beddeshid ballanta kormeeridda ah riix batanka  claamadda saxda si aad u aragtid liiska ballamaha la heli karo aadna u dooratid ballan ama waqti kale.

Haddii aad doonaysid inaad beddeshid ballanta rasmiga ah, riix batanka 'dib ii celi' ee ku yaal mastaradda calaamadaha. Waxay dib kuugu celinaysaa boggi hore, kadibna waxaad dooran kartaa ballan cusub (waqti ama taariikh kaleba).

Marka aad dhammaysid riix batanka sii wad.

Dalabkaagii waa la aqbalay waxaana lagu sameeyey buukin. Boggan ayaa xaqiijin doona dhammaan warbixinaha aad halkan gelisay.

Haddii aad riixdid sii wad batankaasi waxa uu kugu celnayaa bogga doorashada. Waxaad halkaas ku qori kartaa dalab kale adigoo riixaya batanka sii wad.

Ama waad ka bixi kartaa bogga adigoo riixaya batanka .

Please confirm your appointment:

Job Number: 1275

Inspection Appointment:

Date: 16 MAY 06

Time: 09:00 - 12:30 [Change this appointment.](#) 

Repair Appointment:

Date: 18 MAY 2006

Time: 09:00 - 12:30

Repair Details: **Repair to Bedroom door, frame or lining.**

Repair Address: **1 Try It Out Street TRY ITO**

Contact number: 02088908940

Access Details:



Appointment booking successful:

Job Number: 3586

Inspection Appointment:

Date: 04 JUL 06

Time: 12:30 - 16:30

Repair Appointment:

Date: 06 JUL 2006

Time: 12:30 - 16:30

Repair Details: **Repair to Bedroom door, frame or lining.**

Repair Address: **1 Try It Out Street TRY ITO**

Contact number: 029 78376329

Access Details:





Mas'uuliyadaha Dayactirka

Dayactirrada ay Hounslow Homes mas'uulka ka tahay?

Waxaan mas'uul ka nahay cillad-bixinta qaab dhismeedka guriga, bannaankiisa iyo qalabka iyo agabka lagu bixiyey ama lagu dhigay guriga (oo si caadi ah u duugooba).

Waxaa ka mid ah:

Dibedda

- Daaqadaha
- Jaran-jarrooyinka
- Qurxinta
- Albaabada
- Dhumaha biyo-saarka
- Garaashka
- Saqafka iyo gidaarka
- Tuubada qashinka
- Waddada (haddii xaaladdu halis tahay)
- Meelaha moosa qashinka iyo biyaha roobka
- Dhuunta qaaca (ma aha guud ahaan)
- Bakhaarrada dibedda ee aan bixinay.

Gudaha

- Faraxalka/qubayska (caadi u duugooba)
- Sagxadda iyo saqafka gudaha
- Gidaarrada
- Albaabada (haddii aadan adigu bixinin)
- Gacanka biyo-raaciska musqusha
- Saxanka dhaqmaha weelka
- Musqulaha

Ilaalinta dayactirka iyo inay si fiican u shaqeeyaan...

- Taangiyada kululaynta, goobaha dabka lagu shito/dabka, kululaynta biyaha, hiitarrada iyo raayatooraha kululeeyayaasha.
- Dhumaha gaaska iyo biyaha
- Fiilooyinka dabka, godadka dabka, qalabka nalalka iyo maraxawadaha hawada dhuuqa (ee aan gelinay)
- Dhumaha qashinka
- Anteenoyinka telefiishanka ee la wadaago, jaranjarrooyinka, marawaxadaha qallajinta (ee aan gelinay), sameecadaha gelitaanka iyo kuwa wiishashka.



Waa maxay dayactirrada aan anigu mas'uulka ka ahay?

Waxaad mas'uul ka tahay:

- iibsashada iyo xirista furka ama daboollada iyo silsiladaha saxamada weelka, saxanka dhaqmaha, iyo silsiladda la jiido ee Musqusha.
- iibsashada iyo xirista fadhiga Musqusha (Waxaa ka reebban kuwa goobaha la wadaago iyo kuwa macaamiisha da'da ah ama qaba baahida khaaska ah)
- agabka iyo xiristooda, sida biraha daahyada
- nalalka, fadhiyada nalalka iyo xoojiyaha korontada, daboollada qalabka kala duwan ku xirma.
- Muraayadaha gidaarrada gudaha, albaabada ama armaajooyinka
- Shaqada, beddelaadda ama qalabka ay dadkii hore u degganaa ama adiguba aad si mutaddawacnimo ah u geliseen
- xayndaabka (Marka laga reebo inaad leedahay carruur ka yar 5 sano oo xayndaabkuna u dhexeeyo guriga iyo waddo weyn, goob biyood, jid tareen ama goobta baabuurta la dhigto)
- qurxinta gudaha guriga
- cunto-kariyaha, qaboojiyaha, mishiinka dhaqmaha (oo uu ku jiro kharashka gelintooda)
- dayactirka ama beddelka qalab aysan kuu dhigin Hounslow Homes
- Haddii ay furayaashu kaa lumaan ama aad gudaha iskaga xirtid, waxaa lagugu dallacayaa kharashka gelitaanka laguugu furay guriga, iyo kan quful cusub laguugu geliyo iyo shaqada hagaajinta ah ee laga qabto albaabka iyo fadhiga albaabka intaba.
- haddii dayactirka ama beddelka uu ku yimid cillad aad adiga, qoyska ama kuwa ku soo booqda ay sababteeda leeyihiin. Haddii dayactirka loo sameeyo arimo dhinaca fayo-qabka ah, kharashka waa laguugu soo dallacayaa.

Guud ahaan, xayndaabka iyo ganjeelka adiga ayaa mas'uul ka ah; laakiin waxa jira marar aan dayactirno. Ka hor inta aadan ku guurin guriga waxa xaaladda xayndaabka iyo ganjeelku ay ahaanayaan kuwo wanaagsan.

Intaas kadib, waxaan xayndaabka iyo ganjeelka dayactiraynaa haddii aan u aragno inay halis kaaga iman karti adiga ama dadka kale ee degaanka, tusaale ahaan haddii xayndaabku ku xirmo waddo weyn, jid tareen ama meelo kale oo waxyeello ka iman karto aadna haysatid carruur da'doodu ka yar tahay 5 sano oo kula deggan.



Graphical Repairs Ordering Service User Guide - Somali

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dayactirrada waxa laga heli karaa buug-gacmeedka lagu magacaabo 'Reporting your Repairs'. Ijaartayaasha – fadlan wixii macluumaad ah waa inaad tixraacdaan buug-gacmeedka lagu magacaabo Leaseholders Handbook. Fadlan nala soo xiriira haddii aad u baahan tihiin nuqul ka mid ah buugaagtaas.